XAFIISKA AGAASIMAHA

Kate Brown, Guddoomiyaha Gobolka

Oregon Health Authority

500 Summer St NE E20
Salem OR 97301
Codka: 503-947-2340
Fakiska: 503-947-2341

Hagista Kumeelgaarka ah ee Tallaalka Furuqa Daanyeerka (hMPXV)

9/14/2022

Hagistan kumeelgaarka ah waxay cusboonaysiinaysaa talooyinka loogu talagalay isticmaalka tallaalka JYNNEOS ee kahortagga furuqa daanyeerka ee ka jira Oregon. Hadafka ugu dambeeya ee xeeladda tallaalka ee OHA waa in qof kasta oo ka faa'iidaysan karo uu helo tallaalka. Markaan u dhaqaaqnay gaarista hadafkaas, waxaan kaqebgelinay ururrada bulsheed, maamulada caafimaadka dadweynaha ee maxalliga ah, Qabaa'ilka iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka si ay u horumariyaan shuruudaha u-qalmitaanka tallaalka ee soo socda si loo ilaaliyo dadka halista ugu badan ugu jira inuu ku dhaco furuqa daanyeerka iyadoo la dhimayo fongorta oo la horumarinayo xaqsoorka tallaalka.

1. U-qalmida

Iyadoo lala tashanayo ururrada bulsheed, maamulka caafimaadka dadweynaha ee maxalliga ah, Qabaa'ilka, iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, waxaanu balaarinay u-qalmitaanka tallaalka (Shaxda 1-aad). Si looga fogaado fongorta oo loo gaaro dad badan oo ka faa'iideysan kara tallaalka JYNNEOS, dib dambe uma adeegsan doono aqoonsiyada jinsiyeed iyo dabeecadaha galmo ee qaybta ka ah shuruudaha u-qalmitaanka.

Shaxda 1. Shuruudaha u-qalmitaanka tallaalka furuqa daanyeerka ee JYNNEOS (hMPXV), Oregon

1. Qof kasta oo ay u aqoonsatay waaxda caafimaadka dadwaynuhu inuu u dhowaaday qof qaba furuqa daanyeerka
2. Qof kasta oo u dhowaaday qof qaba furuqa daanyeerka
3. Shaqaalaha shaybaarka ee sida joogtada ah u sameeya baaritaanka fayraska furuqa daayeerka
4. Dhakhaatiirta halista sare ugu jira inay ugu baylah noqdaan cudurka gudaha shaqada (tus., qoonta furuqa ee la baaray ama muunadaha furuqa daayeerka ee lagu qaaday shaybaarka iyadoo aan la isticmaalin qalabka ilaaliya shaqsiga ee lagula taliyay)
5. Qof kasta oo fisha inuu taabasho maqaar-ka-maqaar ah la yeeshay ama la sameeyay ugu yaraan hal qof oo kale OO garanaya dad kale oo ka mid ah bulshada uu ku xiran yahay ama bulshooyinka uu ku dhacay furuqa daanyeerka

Xiriirada dhow ee dadka qaba furuqa daanyeerka ee loo qaateenka ah ama la xaqiijiyay waa in la tallaalaa sida ugu dhakhsaha badan (14 maalmood gudahooda) kadib u-baylah noqoshadii ugu dambaysay. Tallaalka la qaato 0–4 maalmood kadib u-baylah noqoshada ayaa laga yaabaa inuu kahortagto jirro, halka tallaalka la qaato 5-14 maalmood kadib u-baylah noqoshada ayaa laga yaabaa inuu ugu yaraan dhimi karo darnaanta ama muddada jirrada. Tallaalida dadka looga shakisan yahay furuqa daanyeerka ayaa sidoo kale la tixgelin karaa haddii tusmada tuhunka furuqa daanyeerka ee kiiska uu sarreeyo iyo si loo xaqiijiyo bixinta tallaalka 14 maalmood gudahooda. Tallaalida kadib u-baylah noqoshada cudurka, oo ay ku jiraan shaqaalaha daryeelka caafimaadka, ayaa ahmiyad siisa dadka halista sare iyo dhexe ugu jira u baylah noqoshada cudurka.

Waqti xaadirkan, ma jirto wax caddeynaya in furuqa daanyeerka lagu kala qaado kala qeybgalka munaasabad ka dhacaysa bannaanka dad si buuxda u lebbisan; isku tijaabinta dharka ama kabaha yaala dukaanka; ku safrida garoonka diyaaradaha, raacitaanka diyaarada ama gaadiidka kale ee dadweynaha; ku dabaalashada barkadda ama bad, webi ama haro; ama is-taabshada caadiga ah ee dadka kale.

2. **Hirgelinta si Ahmiyad Loo Siiyo Helitaanka Tallaalka ee Dadka Saameynta Ugu Badan Ku Leeyahay furuqa hMPXV**

    a. **Shuruudaha u-qalmitaanka ee ballaaran waxay u keeni karaan caqabado hawleed LPHA-yada, rugaha caafimaadka, iyo nidaamyada daryeelka caafimaadka qaarkood.** Waxaan bixinaa shuruudaha soo socda si aan u caawino waaxda caafimaadka dadweynaha iyo xarumaha daryeelka caafimaadka si loo aqoonsado dadka iyo bulshooyinka halista weyn ugu jira inuu ku dhaco furuqa daanyeerka kuwaasoo si aan kala sooc lahayn uu u saameeyay cudurka hadda dillaacay ee loogu talagalay tallaalka JYNNEOS (Shaxda 2-aad). Tani waxay gacan ka geysan doontaa ahmiyad-siinta waxbarashada, dadaallada wacyigelinta, iyo ku meelaynta goobaha tallaalka laga heli karo, iyo sidoo kale si gacan looga geysato hagida wadahadalada la xiriira faa'iidooyinka iyo khataraha tallaalka. Waxaan ku talinaynaa in bixiyeyaasha ay aqbalaan iska warbixinta shuruud kasta si loogu qalmo tallaalka.

Shaxda 2. Hagitaanka shuruudaha tallaalka ee loogu talagalay maamulka caafimaadka dadweynaha, rugaha caafimaadka, iyo nidaamyada daryeelka caafimaadka, Oregon
Tallaalka furuqa daanyeerka ee JYNNEOS (hMPXV) ayaa lagula talinayaa qof kasta: • Oo bixiyihiisa daryeelka caafimaadka kula taliyo tallaalka furuqa daanyeerka • Oo si toos ah oo muddo-dheer taabasho maqaar-ka-maqaar la yeeshay qof qaba furuqa daayeerka • Oo si firfircoon ula galmooday laba lammaane ama in ka badan ama lahaa lammaane galmo uu la wadaagay laba lammaane ama ka badan • Oo qaba HIV

Shaxda 2. Hagitaanka shuruudaha tallaalka ee loogu talagalay maamulka caafimaadka dadweynaha, rugaha caafimaadka, iyo nidaamyada daryeelka caafimaadka, Oregon
• Oo u-qalma inuu qaato daawada HIV PrEP ama qaadanaya daawada HIV PrEP • Oo, tan iyo Juun 1, 2022, yeeshay lammaane galmo oo cusub • Oo, sannadkii la soo dhaafay, laga helay cudurka jabtada, kalamiidiya ama waraabowga • Oo, sannadkii la soo dhaafay, galmo la sameeyay lammaane aan la garanayn, kaqeybgalay goob galmo lagu sameeyo, ama galmo kooxeed sameeyay • Oo galmada weydaarsado lacag, alaab, ama adeegyo • Oo ka shaqeeya goob galmo lagu sameeyo ama qoob-ka-ciyaarka goobaha madadaalada ee dadka waaweyn

b. **Sii ahmiyad** bulshooyinka iyo dadka ay si aan kala-sooc lahayn uu u saameeyay furuqa daanyeerka **iyo cidda uu furuqa daanyeerka u keeni karo halis caafimaad oo daran ama is gooniyeynta ayaa noqon karta mid aad u adag iyo/ama dhaqaale ahaan adag.** Dadka mudnaanta leh ayaa sidoo kale waxaa lagu qeexi karaa qoddobada caafimaadka iyo arrimaha bulsheed ee muhiimka u ah caafimaadka markay isgafaan mahadhooyinka LGBTQIA2S+ iyo sinjiyiyada iyo qowmiyadaha bulshada ay saameeyeen xaqsoor la'aanta caafimaadka. Qodobbada caafimaadka iyo arrimaha bulsheed ee caafimaadka waxaa ka mid ah:

   i. Shakhsiyaadka qaba HIV.

   ii. Shakhsiyaadka qaadanaya ama u-qalma inay qaataan daawooyinka looga hortago HIV.

   iii. Shakhsiyaadka laga helay bakteeriyayada STI (jabtada, kalamiidiya, waraabowga) 12 bilood kahor.

   iv. Dadka halista ugu jira natiijooyinka aadka u daran (dadka uurka leh iyo kuwa naasnuujinaya iyo dadka si dhexdhexaad ilaa si daran difaaca jirkoodu u daciifay, cudurka maqaarka ee daran, iyo cudurrada nabarreysiga maqaarka).

   v. Shakhsiyaadka hoy-la'aanta ah ama guri joogto ah aan degganayn, ee isticmaalaya daawada methamphetamine, ee kaqeybqaadanaya galmada wax is-dhaafsiga, ama kuwa hadda ama dhowaanahan la xiray.

c. **La shaqee hay'adaha bulsheed ama ganacsiyada maxalliga ah si loo soo bandhigo munaasabadaha tallaal ee ku saleysan goobaha ee mudnaanta siisa bulshooyinka uu sida aadka ah u saameeyay furuqa daanyeerka.** Rugaha caafimaadka ee tallaalka lagu bixiyo ee ku yaala goobaha bannaan ama munaasabadaha ay ku badan yihiin dadka ka soo jeeda bulshooyinka uu aadka u saameeyay furuqa daanyeerka ayaa ka dhigi doona tallaalka mid la heli karo oo la aqbali karo. Qof kasta oo codsada inuu tallaalka ku qaato munaasabadaha tallaalka ee bulsheed waa inuu helaa.

d. **Markay suurtogal tahay, isku-xir bixinta tallaalka furuqa daayeerka iyo tallaalka hargabka, garoojooyinka xoojinta ah ee COVID-19, baaritaanka COVID-19, baaritaanka HIV/STI, macluumaadka iyo gudbinada HIV PrEP, iyo waxbarashada iyo wacyi-gelinta dhimista waxyeellada.** Isku biirinta adeegyada ayaa dhimi karta fonqorta la xiriirta qaadashada tallaalka furuqa daanyeerka iyadoo dadku ay imaan karaan munaasabadaha tallaalka ee loogu talagalay mid ka mid ah adeegyada badan.

e. Iyadoo lagu saleynayo hagista CDC, sii wad **ka siinta maqaarka dhexdiisa (ID)** dadka badankooda si loo kordhiyo tirada garoojooyinka tallaalke ee la heli karo. Fadlan ka eeg Shuruudaha Tallaalka JYNNEOS ee OHA wixii faahfaahin ah.

   vi. Waxaan filaynaa in iyadoo ku xiran goobta hawada lahayn ee la xiriirta cirbadda iyo siliingada si loo bixiyo garoojooyinka caabuqa dhalin kara (ID), dhalo kasta oo 0.5-mL ku jirto ayaa bixin doonta 3–5 garoojo.

   vii. Ikhtiyaarada qaadashada waxaa ka mid ah dhudhunka hore ee dhabarka dambe iyo dhabarka sare oo ka hooseeya garabka. Fadlan bixi labada ikhtiyaar, maadaama dadka qaarkood ay doorbidaan inaysan falcelin muuqata ku yeelan goobta durritaanka ee ku taala dhudhunka hore ilaa dhowr toddobaad.

   viii. Kala tali tallaal bixiyeyaasha falcelinada goobta durritaanka ee soo noqnoqota ee tallaalka laga qaato maqaarka dhexdiisa ee JYNNEOS.

   ix. Dadka da'doodu ka yar tahay 18 jir oo leh taariikh burro-nabareed waa inay ka qaataan maqaarka hoostiisa tallaalka JYNNEOS.

   x. Dadka qaba falcelinada daran ee goobta durritaanka, oo ay ku jiraan kuwa dhaca waqtiga garoojada labaad, ayaa garoojada labaad laga siin karaa maqaarka hoostiisa iyadoo lagu saleynayo go'aanka caafimaadka ee ay wada gaaraan bukaanka iyo bixiyaha.

   xi. Marka dhalada la jebiyo, tallaalada oo dhan waa in la bixiyaa 8 saacadood gudahooda. Qabanqaabooyinka loogu talagalay tallaalka inta lagu jiro kullanada rugaha caafimaadka ama dhacdooyinka tallaalka ayaa dhimi kara halista garoojooyinka la khasaariyo. Si kastaba ha ahaatee, suurtogal

ma ahan in mar walba la sadaalliyo ballamaha la seegay ama sababaha kale ee loogu talagalay garoojooyinka soo haray. **Si loo kordhiyo isticmaalka dhammaan garoojooyinka tallaalka, waxaan kugula talinaynaa in horay wax loo sii qorsheeyo si loo aqoonsado oo loola xiriiro dadka heli kara garoojada tallaalka kahor dhammaadka rugta ama munaasabadda tallaalka, oo ay ku jiraan:**

1. Dadka u-qalma tallaalka ee aan weli helin garoojada koowaad (tus., liiska sugitaanka ee dadka u-qalma ee sugaya garoojooyinka koowaad)
2. Dadka la siiyay garoojada koowaad ugu yaraan 28 maalmood kahor (tus., liiska dadka horay u qaateen garoojooyinka koowaad), oo ay ugu horeeyaan kuwa ugu hor qaateen garoojooyinkooda koowaad
3. Bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha rugaha caafimaadka ee daryeelay laba bukaan ama in ka badan kuwaasoo laga helay fayraska busbuska daanyeerka ama furuqa daanyeerka

f. **Bixi garoojooyinka labaad ugu yaraan 28 maalmood kadib garoojada koowaad.** Maadaama la ballaarinayo saadka tallaalka, garoojooyinka labaad waa in hadda loo bixiyaa si waqtiyeysan. Iyadoo in ka badan 90% dadku ay yeeshaan falcelin jeermis-la-deris 2–4 toddobaad kadib garoojada koowaad, laba garoojo ayaa loo baahan yahay si looga hortago furuqa daanyeerka, ee leh falcelinta lidka-jirka ee ugu sarreeya 2 toddobaad kadib garoojada labaad. Muddee waqtiga la qaadanayo garoojada labaad xilliga la qaadanayo garoojada koowaad. Bixiyeyaasha tallaalka waa inay dadka kala taliyaan sidii ay u dhimi lahaayeen halista qaadista furuqa daayeerka markay sugayaan garoojadooda labaad.

g. **Tallaalka JYNNEOS waxaa lala qaadan karaa tallaalo kale.** Isla qaadashada tallaalada JYNNEOS iyo COVID-19 iskuma ahan lid. Si kastaba ha ahaatee, iyadoo ugu wacan tahay halista la diiwaangeliyay ee bararka murqaha wadnaha (myocarditis) kadib tallaallada mRNA COVID-19 iyo halista aan la garanayn ee bararka murqaha wadnaha (myocarditis) kadib tallalka JYNNEOS, CDC waxay soo jeedinaysaa dib u dhigis in lagu sameeyo tallaalada COVID-19 hadib 4 toddobaad marka la qaato JYNNEOS, gaar ahaan dhalinyarada ama ragga qaangaarka ah. Xirmada baakadda JYNNEOS FDA, si kastaba ha ahaatee, waxay sheegaysaa in sameynta xun ee wadnaha ee dadka gaarka ah, 6 xaaladood (0.08%) loo tixgeliyey inay la xiriiraan tallaalka JYNNEOS. Midna looma tixgelin inuu daran yahay, midna lama soo sheegin inuu yahay bararka murqaha wadnaha (myocarditis). Sidaas darteed, waxaan ku talinaynaa in la wadaago go'aan gaarista caafimaad marka la tixgelinayo in la isla wada qaato tallaallada JYNNEOS iyo COVID-19 iyo in kale.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa xogta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Qeybta Isgaarsiinta COVID-19 lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us